HAGITAANKA KU SOCDA WAALIDIINKA
IYO MASUULIYIINTA LEH TAARIIKH SOO
GALOOTI AMA QAXOOTINIMO

# Sida loo ilaaliyo xuquuqda ilmahaaga

Ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku noolaado nolol wanaagsan oo amaan leh. Finland waxaa ka go'an Heshiiska xuquuqda caruurta ee Qaramada Midooday, kaasoo ujeeddadiisu yahay in la ilaaliyo caruurta si ay ugu koraan goob amaan ah oo ay la siman yihiin caruurta kale. Dadka waaweyn ayaa markasta mas'uul ka ah hubinta in xuquuqda caruurta la ixtiraamo. Hagitaankan wuxuu si kooban u sharxayaa waxa ay yihiin xuquuqda ugu muhiimsan ee caruurta, sida aad u hubin karto in la ixtiraamo xuquuqda caruurta iyo halka aad ka heli karto taageerada barbaarinta waalidnimo.

Barbaarinta waalidnimo ee wanaagsan waxay ka macnaysan tahay waa ka qaybqaadashada firfircoon ee nolosha ilmahaaga, waxbarashada iyo hiwaayadihiisa.

TAAGEERADA DADKA NABAD-GALYO DOONKA AH

# Marka dadka waaweyni ay go'aan ka gaaraan arimaha khuseeya ilmaha, waa inay markasta sameeyan waxa u roon ilmaha

*Wakhtiyada qaarkood waxaan leenahay wada-hadal qoys oo ku saabsan, waxaad dhahdaa, intee goor ayaan banaanka kusoo daahi karaa.*

*Wiilka 13*

Waalidiintu waxay leeyihiin mas'uuliyadda koobaad ee barbaarinta iyo koriinka ilmahooda si waafaqsan danta ilmaha. Markaad go'aan ka gaartid arimaha khuseeya ilmaha, ka fikir waxa u wanaagsan ilmaha iyo sida uu go'aankaagu u saamaynayo ilmaha. Dhegayso ilmahaaga marka aad go'aano qaadanayso oo ku xisaabtan fikradahooda, adigoo maskaxda ku haya da'dooda iyo heerka koriinkooda. U sheeg caruurta go'aamada iyaga khuseeya si ay u fahmaan. Wadanka waa inuu ilaala caruurta qaxootiga ah. Dhamaan arimaha khuseeya caruurta, dantooda ugu wanaagsan waa in ay noqota tixgelinta koobaad. Marka maamulka - tusaale ahaan, shaqaalaha xarunta soo dhowaynta, dawlada hoose, xarunta caafimaadka caruurta, daryeelka, dugsiga ama adeegga caafimaadka - ay go'aan ka gaaraan ilmahaaga, weydii sida loo qiimeeyay danta ilmaha.

Haddii aad u malaynayso in danta ilmahaaga aan lagaga bixin nidaamka codsigaaga ogolaanshaha deganaansha, caawimaad weydiiso lataliye sharci ahaaneed ama ururu la shaqeeya qaxoontiyada. Waydii maamulka warbixinaha ka caawin kara in la ogaado danta ilmaha, tusaale ahaan, racfaan qaadasho ku waydii. Haddii ilmahaaga la wareysto waalidka la'aantiis, xaqiiji in ilmuhu dareemayo badqab iyo in qof caawiye uu la joogo qolka waraysiga.

Haddii loo baahdo, codso turjumaan markaad la kulmayso maamulka. Sida sharcigu qabo, arimaha ku saabsan caruurta mar walba waa la tarjumaa. Ha u isticmaalin ilmahaaga turjubaan ahaan. Go'aamada ay gaaraan madaxda badanaa way adag yihiin in la fahmo. Ka codso inay ku sharxaan go'aanka si faahfaahsan.

> *Caruurtu waxay go'aan ka gaaraan arimo badan, laakiin waa in lala joogaa si loo xakameeyo.*
>
> *Aabo*

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- waxyaabaha ay crruurtu go'aan ka gaari karaan, waxa waalidku go'aamiyo iyo waxa maamulku go'aamiyo
- waxa uu yahay xalka ugu wanaagsan ee arin

# Caruurta waxay xaq u leeyihiin inay noqdaan waxa ay rabaan oo si siman loola dhaqmo

*Haddii ilmahaaga loo xoog-sheegtay, waa inaad isla markaaba nala soo xiriirta, haddii uusan macallimku arintan wax ka qaban isaga oo la tashanaya waalidka.*

*Shaqaalaha dadweynaha ee dawlada hoose*

Ilmo kasta waa in la ixtiraamaa iyadoon loo tixgalinaynin lab iyo dhedig, luqadda ay ku hadlaan, waxay aaminsan yihiin ama sida u eg yihiin, wadanka ay asal ahaan ka yimaadeen ama haddii ay ku yimaadeen qaxootinimo ama magangalyo doonimo. Qofna waa inaan la takoorin, loo cagajugleyn ama si xun loola dhaqmin. Haddii ilmahaaga lagu xoogsheegto goobta daryeelka maalinta,

> *Haddii macalinku uusan wax ka qabanin, waa inaad adigu wax ka qabataa.*
>
> *Gabar 16*

dugsiga, hiwaayadaha ama onlaynka, la hadal ilmahaaga. U sheeg ilmahaaga in caruurtu ay ku tiirsanaadaan qof weyn caawimaad xaalad kasta. Ku taageer ilmahaaga siduu wax uga qaban lahaa xaaladahan oo ka caawi inay xaliyaan isfahi waaga iyada oo aan la faragelin jir ahaaneed la samaynin. Caruurtu waa inay bartaan inay xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan badqab iyo in si wanaagsan loola dhaqmo. Kala hadal macalinka ilmahaaga ee dugsiga ama xarunta daryeelka caruurta ama macalinka ilmahaaga hiwaayada ilmaha. Haddii waalidka aan loo sheegin cagajugleynta iyo cunsuriyad, ma awoodi doonaan inay arinta kala hadlaan ilmahooda. Shaqaale bulsho ayaa sidoo kale la xiriiri kara dugsiga.

Mararka qaarkood caruurtu waxay dareemi karaan in wiilasha laga qiimeeyaa in ka badan gabdhaha guriga. Hiigso inaad si isku mid ah ula dhaqanto caruurtaada oo aad siiso shaqooyin isku mid ah iyo xoriyada iyada oo aan loo eegin jinsigooda. Haddii ilmahaagu kuu sheego nooca galmadooda ama aqoonsiga jinsiga, taageer.

> *Haddii aan qabto hawlo dibada, waa maxay sababta walaalkay iga yar aanu u qabanayn hawlaha gudaha?*
>
> *Gabar 17*

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- maxay kaaga dhigan tahay inaad noqoto waxa aad rabto
- waa maxay waxyaabaha uu ku wanaagsan yahay ilmahaagu
- waxa uu takoor yahay
- haddii ilmahaagu la kulmay takoor ama laga takooray dad kale
- sida loola tacaalo takoorka xaaladaha kala duwan

# Caruurta waxay xaq u leeyihiin daryeel iyo feejignaan oo ay dareemaan badqab



*In si badqab leh u noolaato waxay ka micnaysan tahay inaad banaanka u bixi karto oo aad aadi karto hawlahaaga adoon walwalaynin.*

*Gabar 16*

Dawlada waxaa ku waajib ah inay ka taageero waalidiinta korinta caruurtooda.

DHALMADA IYO XARUNTA CAAFIMAADKA ILMAHA

Dhamaan carruurta iyo haweenka uurka leh waxay xaq u leeyihiin adeegyada xarun caafimaad ee hooyada iyo dhalaanka, haddii ay haystaan sharci deganaansho iyo haddii kaleba. Xarumaha caafinaadka ee la-talinta qoysku waxay bixiyaan caawinaad su'aalaha la xiriira koriinka iyo korintaa ilmaha ama dhalinyarada waxayna ka caawiyaan dhibaatooyinka qoyska. Xarunta caafimaadka la-talinta qoyska ayaa laga yaabaa inay siiso qof taageera ilmo.

ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Dhamaan caruurta da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay xaq u leeyihiin inay dareemaan caafimaad oo ay helaan daryeel. Xarumaha soo dhowaynta ayaa mas'uul ka ah qabaqaabinta adeegyada caafimaadka dadka magangalyo-doonka ah. Caruurta haysata sharciga degenaanshiyaha waxay helaan daryeel caafimaad oo qayb ka ah adeegyada dawlada hoose, si la mid ah caruurta aan sharciga haysan ee ku nool meel ka baxsan nidaamka soo dhawaynta.

WAXBARASHADA CARUURNIMADA HORE IYO DARYEELKA

Waxbarashada caruurnimada hore iyo daryeelka waxaa loola jeedaa waxbarashada, waxbaritaankaa iyo daryeelka caruurta ee xarunta daryeelka ee maalinta ama daryeelka qoyska. Caruurta haysata sharciga degenaanshada waxay xaq u leeyihiin waxbarashada caruurnimada hore iyo daryeelka. Caruurta ku jirta magangaliyo ku meel gaarka ah iyo magangelyo-doonku waxay xaq u leeyihiin daryeel maalmeed haddii waalidkood shaqeeyaan ama wax baranayo.

Caruurta magangalyo doonka ah waxaa laga yaabaa inay dareemaan nuglaansho kahor inta aysan helin ogolaanshaha deganaanshaha. Hala qabsado ilmahaaga jadwal maalmeedka, xitaa xarunta soo dhaweynta ama hoyga guriga. Nolosha sida caadiga ah ee suurtogalka ah marka lagu jiro duruuftu waxay siisaa taageerada ugu fiican caruurta. Haddii aad daalan tahay oo aad dareento in ilmahaagu u baahan yahay dhiirigelin iyo la shaqaynta caruurta kale, weydii shaqaalaha xarunta soo dhowaynta inay ogaadaan haddii ilmahaagu boos ka heli karo xarunta daryeelka maalinta. Xarunta daryeelka maalmeedka, caruurta waxaa la baraa hawl-maalmeedka caadiga ah waxaana laga caawiyaa habka hurdada. Haddii aad tahay soo galooti aan sharci lahayn, ka codso daryeelka caruurta ama adeegyada socdaalka si aad u ogaatid haddii ilmahaagu heli karo xarunta daryeelka maalintii.

# Caruurta waxay xaq u leeyihiin daryeel iyo feejignaan oo ay dareemaan badqab

SHAQADA BULSHO EE QOYSKA IYO DARYEELKA ILMAHA

Mararka qaarkood waalidiintu way daali karaan mana xakamayn karaan xaaladda guriga. Caruurtu waxa laga yaabaa inay si xun u dhaqmaan, wakhti badan ku qaataan ciyaaraha ama noqdaan kuwa wax khariba. Way mudan tahay in wax laga qabto dhibaatooyinka kahor intaanay aad u weynaan. Caawinaad ka codso shaqaalaha bulsho. Shaqada bulshada qoysku waxay ujeedadeedu tahay inay caawiyaan qoysaska oo ay ka hortagaan baahida adeegyada daryeelka caruurta. Haddii aad ku nooshahay xerada soo dhaweynta soo galootiga, caawimo weydiiso shaqaale bulsho ama qoys iyo shaqaalaha dhibaatooyinka. Maamulka daryeelka caruurta ayaa ilaaliya fayo-qabk caruurta oo bixiya taageerada waalidnimo. Ilmaha waxa la geeyaa daryeel marka uu ku jro xaalad adag oo daran. Sii wadida meelaynta si joogto ah ayaa dib loogu eegaa.
Marka qoyska caruurta leh aan la siin sharciga degenaanshada, qoyskuna ay ka baxaan xerada soo dhaweynta soo galootiga, caruurta waxaa lagu wargeliyaa adeegyada daryeelka caruurta, waxaana la bilaabayaa habka qiimeynta baahida adeegyada. Adeegyada daryeelka caruurtu waxay bixiyaan taageero dheeraad ah nolol maalmeedka qoyska aan sharciga lahayn. Caruurtu waxay xaq u leeyihiin sharaf xaalad kasta. Ha isticmaalin ciqaabta jir ahaaneed markaad ku xanaaqdo ilmahaaga.

Xaq uma lihid sabab kasta - sida dhawritaanka sharafta qoyska, diinta ama caqiidada kale - inaad jir ahaan u ciqaabto ilmaha. Dhaqamada dhibaatada leh waxaa kamid ah gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha lagu sameeyo.



**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- muxuu ilmahaaga ku dareema badqab iyo amaan

# Caruurta waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan oo ay dugsi dhigtaan

*Marka guriga la joogo, waxaa nalagu dhiirigaliyay inaan dhigano dugsiga, waxaana naloo sheegay inay muhiim tahay inaan wax barno.*

*Gabar 14*



## WAXBARASHADA DUGSIGA HOOSE KAHOR IYO WAXBARASHADA AASAASIGA AH

Ilmo kasta oo Finland ku nool wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarashada caruurnimada hore iyo waxbarashada aasaasiga ah iyo inuu helo taageerada waxbarashada. Waa mas'uuliyadda waalidka si ay u hubiyaan in ilmahoodu dugsiga soo xaadiro iyo inay sharaxaan sababta maqnaanshaha kasta.

Mararka qaarkood caruurtu waxay dareemaan cadaadis si ay u gaaraan darajooyin wanaagsan dugsiga si ay ugu muujiyaan guriga. Sii caruurtaada xaqa ay ugu koraan xawaraaha awoodooda ah.

Haddii aadan fahmin fariimaha Wilma oo aad dareento in laga saaray kulamada fiidkii ee waalidka iyo dugsiga ilmahaaga, weydii in lagugu caawiyo luqadaada marka aad la macaamilayso dugsiga ilmahaaga. Soo ogow haddii dugsigaagu leeyahay lataliye dhaqamo badan. Weydiiso in aad la tashato dheeraad ah oo la la yeesho waalid iyo macalin ah oo luqadaada ah. U soo jeedi macalinka inaad isticmaali karto kaararka Wilho ee loogu talagalay dadka luuqadaha badan ku hadla.

> *Markasta waxaan helaa darajooyin sare laakiin haddii darajooyinkaydu hoos u dhacaan, waalidkay waxay rabaan inay ka hadlaan.*
>
> *Wiilka 13*

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- sida ilmuhu dugsiga ku yahay, nooca cadaadiska ay la kulmaan
- haddii ilmahaagu helo taageero ku filan oo uu wax ku barto
- haddii ilmahaagu ka faa'iidaysan lahaa taageerada waxbarashada dugsiga

# Caruurtu waxay xaq u leeyihiin nasasho iyo firaaqo

*Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay doortaan saaxiibadooda, laakiin waxaan xaq u leeyahay inaan ogaado dadka ay yihiin, yaa caruurta dhalay iyo goobta ay aadaan.*

*Hooyo*

*Haddii aan maamule ka noqon lahaa xarunta soo dhowaynta, waxa aan xarunta u samayn lahaa alaabta ay ku ciyaaraan.*

*Wiilka 6*

Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu leeyahay layli guri iyo hawlo ay tahay uu qabto, laakiin hubi in sidoo kale uu jiro wakhti uu ku ciyaaro, ciyaaro, saaxiibo iyo nasasho.

Wakhtiga sugitaanka go'aanka codsiga ogolaanshaha joogitaanka ayaa soo jiidi kara. U fiirso waxyaabaha la sameeyo; waydii caruurtaada noocyada hawlaha ay ku raaxaysan lahaayeen. Habraaca soo dhaweynta waxaa ku jira miisaaniyad lagu taageerayo ilmo kasta si uu u xaadiro hawlaha. Waydiiso xarunta soo dhowaynta gunadan. Wax ka weydii hawlaha, dhacdooyinka lacag la'aanta ah ama garoomada caruurta ee goobta laga heli karo. Soo ogow inay deegaanka ka jiraan ururo

*Waxa la ii oggolaaday inaan doorto hiwaayadahayga. Mararka qaarkood safarrada dugsiga ayaa xoogaa ku adag waalidkayga.*

*Gabar 14*

sameeyo hawlo bulsho iyo dhacdooyin qaxooti ah. Waydii adeegyada socdaalka ee dawlada hoose nooca hawlaha firaaqada ee ay heli karaan qoysaska soo galootiga ah.

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- sida ilmahaagu rabo inuu u qaato wakhtigooda firaaqada
- muhiimada ay saaxiibadu u leeyihiin ilmahaaga
- muhiimada nasashada



# Caruurtu waxay xaq u leeyihiin inay ra'yigooda dhiibtaan kana qaybqaataan. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay xoriyad u helaan fikirka, damiirka iyo diinta

*Haddii carruurta loo ogolaado inay sheegaan fikradahooda, dunidu waxay noqon doontaa goob wanaagsan.*

*Gabar 17*

Sida waafaqsan Dastuurka Finland iyo xuquuqda ilmaha, carruurtu mar walba waxay xaq u leeyihiin inay ra'yigooda dhiibtaan. Xitaa haddii aadan ku raacsanayn fikradda ilmahaaga, isku day inaad ixtiraamto. Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu si ka duwan adiga uga fikiro wax walba, oo ay ku jiraan diinta, bulshada ama sida loo labisto.

Marka dadka waaweyni ay go'aan ka gaaraan qoyska iyo ilmahooda, ra'yiga ilmaha waa in la tixgeliyaa. Waa masuuliyada qofka weyn inuu sameeyo carruurta xuduud badqab leh. Haddii ilmahaagu rabo wax ka soo horjeeda danahooda, u sharax sababta aadan u raaci doonin rabitaankooda. Inta ay caruurtaadu korayaan, sii nafaas badan oo ay ku gaaraan go'aanada si ay u bartaan xirfadaha nolosha. Dhegayso caruurtaada oo tixgali fikradahooda.

Caruurtu waxay kaloo xaq u leeyihiin inay ka qaybgalaan oo ay ka qaybqaataan bulshada. Waxay astaan u tahay inay iyagu xil iska saarayaan naftooda iyo mustaqbalkooda.

> *Markaan ku dhahnay ilmahayagii in aynaan taas samayn dhaqankeena, ilmahooda wuxuu yidhi: "laakiin aniga waxaan ahay qof gaar ah!"*
>
> *Aabo*

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- Xaalado noocee ah ayuu ilmahaagu u malaynayaa in lala tashanayo - maxaad u malaynaysaa?
- madalasha baraha bulshada ee ilmahaagu isticmaali karo, iyo haddii koontooyinkooda noqon karo mid guud iyo waxa cawaaqibka ka dhalan kara

# Caruurtu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan oo ay helaan macluumaadka. Caruurtu waxay xaq u leeyihiin asturnaanta iyo qarsoodiga fariimaha

*Waxaan tabagalaa si aan u ogaado waxa ay caruurtaydu daawanayaan. Waan la sheekeystaa oo waxaan weydiiyaa sababta ay kanaalkaas u daawadaan.*

*Hooyo*

Internetka, baraha bulshada, fariimo diritaanka iyo ciyaaraha waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nolosha caruurta. Si joogto ah ugala hadal ilmahaaga isticmaalka warbaahinta oo ku heshiiya sharciyada. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay raadiyaan oo helaan macluumaadka ku saabsan waxyaalaha ay xiiseeyaan. Si kastaba ha ahaatee, waa waajibaadka dadka waaweyn inay ka ilaaliyaan caruurta macluumaadka waxyeelo u leh. Haddii loo baahdo, waxaad xaddidi kartaa gelitaanka internetka ee ilmahaaga oo aad ka mamnuuci kartaa bogagga qaarkood.

Fariimaha uu helo ilmaha waa inaan la akhriyin fasax la'aanteed. Haddii aad u malaynayso in faragelintu ay dani ugu jirto ilmaha, u sharax ilmahaaga sababta aad u dareemayso inay waajib tahay inaad soo farageliso. Sida waafaqsan xaqa asturnaanta ee ilmaha marka loo eego da'da ilmaha. Aamin ilmahaaga oo noqo mid u qalma kalsoonida ilmahaaga.

Ilmahaagu waxa kale oo laga yaabaa in uu kula xiriiro dadka shisheeye ah khadka tooska ah. Kala hadal caruurtaada muhimadda ay leedahay inay kuu sheegaan haddii ay helaan fariimaha dhibaato leh ee ka imanaya dad shisheeye ah ama dadka aysan si fiican u garanaynin.

> *Waxaan u ogolaanayaa caruurtayda inay ku qaataan hal saac maalintii telefoonadooda. Waxaan wakhti badan ku qaadanaa banaanka oo aan wax wada qabanaa.*
>
> *Aabo*

**KALA HADAL ILMAHAAGA**

- waa maxay arimaha khaaska ah ee ilmaha muhiimka u ah
- waxa uu ilmahaagu ka qabo inaad ku dabagasho barnaamijka ab ah
- websaytyadee ayaa caadi ah inay booqdaan marka ay bartaan isticmaalka internetka
- xadidaadda isticmaalka taleefanka iyo kombuyuutarka si loogu helo wakhti layliga guri, shaqooyinka, jimicsiga, wakhtiga qoyska iyo hurdada.

# Caruurta waxay xaq u leeyihiin in qoys lahaadaan

Markaad hesho sharciga degenaanshaha ama magangalyo ee caalamiga ah, laakiin qoyskaagu aanu dalka joogin, waxaad codsan kartaa isukeenida qoyska oo xubnaha qoyskaagu ay kugu soo biiraan Finland. Weydiiso shaqaale bulsho inuu kaa caawiyo foomamka codsigaaga. Haddii aadan caawimaad heli karin, la tasho ururada madaniga ah ama qareen.

Haddii ilmuhu Finland ku soo galay ilmo aan qof la socon, wakiil ayaa loo magacaabayaa ilmaha. Wakiilka iyo shaqaalaha bulshada ee waaxda caruurta aan lala socon ayaa ilaalinaya danta ugu fiican ee ilmaha. Marka ilmaha la siiyo sharciga degenaanshada ama magangalyo ee caalamiga ah, waxay xaq u leeyihiin inay waalidkood iyo walaalahood aan qaan-gaarin ay keenaan Finland. Wakiilka iyo shaqaalaha bulshadu waxay ka caawiyaan habka codsiga.

> *Aamin barbaarintaada oo ku kalsoonow ilmahaaga!*
>
> *Gabar 17*

Haddii hal waalid loo diido inuu dalka joogo, kala tasho la-taliye sharci yaqaan sharciga ajaanibka inuu racfaan ka qaato danta ilmaha awgood. Haddii loo baahdo, weydii shaqaalahaaga bulshada, daryeelka maalinta, dugsiga ama maamulka kale warbixinada.

# Halka laga codsado oo laga helo taageero dheeraad ah

Hubinta in xuquuqda ilmahaaga la ixtiraamo oo ilmahaagu si fiican u shaqeeyo waxay ku siinaysaa farxad sidoo kale. Haddii aad ku rafaadsan tahay sidii aad ula qabsan lahayd, caawimo hel. Aqbal dhamaan kaalmada laguu fidiyo adiga iyo ilmahaaga. Ujeedadu waa in qoyska oo dhan, waalidiinta iyo caruurta si isku mid ah, ay u koraan.

> *Waxaan awood iyo tamar ka helnaa markaan aragno in caruurteenu ay korayaan. Hooyo iyo aabe Waalidiinta ah, caawimaad weydiista oo aqbal dhamaan caawimada laguu fidiyo. Ujeedadu waa in dhamaan qoysku hormaro.*
>
> *Shaqaalaha Bulsho*

Gudaha Finland, xuquuqaha caruurta waxaa ilaalinaya dhexdhexaadiyaha baarlamaanka iyo wakiilka caruurta. Ururo badan ayaa sidoo kale taageera qoysaska qaxootiga iyo soo galootiga ah: Save the Children Finland, the Central Union for Child Welfare, the Mannerheim League for Child Welfare, MIELI Mental Health Finland, Support for Asylum Seekers, the Finnish Refugee Council, the Finnish Refugee Advice Centre, Global Clinic, the Deaconess Foundation, Turun Valkonauhayhdistys ry, Monik, Kasvatus- ja perheneuvonta Kasper, Familia ry, Suomen Vanhempainliitto. Waa hubtaa inaad taagero ka heli meel ku dhaw! Waa hubtaa inaad taagero ka heli meel ku dhaw!

LAPSI-strategia

WARAYSIYADA:

Aqoon is-weydaarsiyada caruurta iyo waalidka, shaqaalaha bulshada ee xarunta soo dhowaynta, qoyska iyo shaqaalaha dhibaatooyinka, shaqaalaha bulshada ee degmada, adeegyada soo galootiga ee aan sharci lahayn, la-taliyayaasha adeegga socdaalka, cilmi-baarayaasha, wakiillada, macllimiinta, turjubaannada, hooyooyinka qoysaska la taliya iyo khubarada ururada: Save the Children Finland, the Central Union for Child Welfare, Support for Asylum Seekers, Turun Valkonauhayhdistys ry, Suomen Vanhempainliitto, the Deaconess Foundation’s Mentor family activities, All Our Children